



## Guddiga Portland oo ansixisay heshiis cusub oo 3 sano ah oo lala gaaray macallimiinta

Guddiga Waxbarashada ee Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay ansixisay heshiis saddex sano ah oo lala gaaray Ururka Macallimiinta ee Portland.

Guddiga, oo kulan gaar ah yeelatay Khamiistii, ayaa cod dhan 7-0 isku raacdya oggolaanshaha Qaraarka 5569, kaasi oo Kormeeraha Guud ee Guadalupe Guerrero u oggolaanaya isla markaana u tilmaamaha u fuliyo heshiiska. Oggolaanshaha waxaa keenay wada xaajood dhammeystiran oo u dhexeeyay keentay degmada iyo ururka kaasi oo bilaabmay 2016-kii.

“Gaaritaanka heshiisku wuxuu ahaa arrin sax ah oo loo qaaday macallimiinteenaa iyo ardaydeena iyo bulshadeena dugsiga,” ayay sheegtay guddoomiyaha Guddiga ee Julia Brim-Edwards.

Dhinacyadu [waxay heshiis aan rasmiga ahayn gaareen](#) bishii la soo dhaafay, iyada oo xubnaha ka tirsan PAT [ay toddobaadkii la soo dhaafay u coddeeyeen in ay ansixiyaan](#) heshiiska.

Heshiishku waa mid buuxinaya saddex sano dugsiyeed, oo ka bilaabmaya 2016 ilaa 2019, iyada oo macallimiintu ay helayaan kor u qaadista mushahar muddo hore la ogolaaday iyo mid mustaqbalka ah. Inkasta oo dhinacyadu ay wada xaajoonayeen ilaa 20 bilood, waxay horumar la taaban karo sameeyeen afartii bilood ee la soo dhaafay ka dib markii saddex xubnood oo cusub ee guddiga iyo Guerrero ay ku soo biireen nidaamka.

“Afartii bilood ee la soo dhaafay ayaa waxaa ku jiray wada hadalo buuxa oo qoto dheer oo ku saabsan arrimaha muhiimka u ah macallimiinta iyo dugsiga degmada labadoodaba,” ayay sheegtay Brim-Edwards.

Madaxweynaha PAT ee Suzanne Cohen ayaa dhiirigelin ka bixisay luqadda heshiiska la isku afgartay ee ku saabsan baaxada fasalka iyada oo ku ammaantay Guerrero in uu furfurnaa ka wada hadalka mawduuca.

“Waa mid muhiim noo ah, iyada oo sida la sheegay, ay runtii muhiim u tahay ardaydeena iyo qoysaskeena,” ayay sheegtay Cohen.

Labada dhinacba waxay heshiiska ku tilmaameen in uu yahay bilowga wada shaqeyn cusub.

“Waxaan ku rajo weynahay xiriirkan cusub ee la soo cusbooneysiyyay,” ayuu sheegay Guerrero. “Xiriiradu waxay u baahin yihiin shaqo la qabto, ballanqaad, taasina waa waxa ay nooga go’an tahay halkan. Aad ayaan u faraxsanahay waxaanan rajo fiican ka qabaa dhibaatooyinka harsan ee aan dhammaanteen isku raacsanahay in aanu wax ka qabano, waxaan ku rajo weynahay in aanu si wadajir ah wax uga qabano.”